



Gacaliyayaal Qoysas,

Xataa iyadoo ay jiraan maalmo qaboow oo qoyan, xilliga si wanaagsan ayuu u socdaa waxaanna u riyaaqnay dhammaan taageerada aad na siisaan sannad-dugsiyadeedka cusub. Fasalka 6 waxay sameeyeen booqasho wanaagsan oo ay ku tageen Xarunta Xirfadaha Nololsha, Risebshanka waxay ku mashquulsanaayeen in ay pizzas ka sameeyaan Pizza Express iyo Fasdalka 3 oo isu diyaarinaaya in ay booqdaan beer deegaanka ku taal. Waad ku mahadsan tihiiin dhammaan taageeradiina oo suurageliyey in booqashooyinka ay dhacaan, waxaan aad ugu riyaaqnay sida degdegta ah ee aad u soo celiseen foomka oggolaanshaha iyo lacag-bixinta, iyo sidoo kale **caawinta gacanta** aad ka geysateen booqashada.

Fadlan sii wad inaad naga caawisid in carruurta ay dugsiga yimaadaan si ay fasallada u galaan durbaba saacadda 8:45. Diiwaangelinta waxay fasalka ka joogsaneysaa 8:50, haddii albaabka cagaaran la xero carruurta waxay dugsiga ka gelaayaan dhinaca xafiiska. Maalinta Badbaadada Internetka ayaa nagu soo fool leh dhawaan, waxaanna diiradda saari doonaa **'Farsamada Caqliga leh iyo mas'uuliyadda isticmaalka Garaadka Macmiilka (AI)'**. Waxaan qaban doonaa kulammo guud si loogu dabbaaldego maalintaas iyo sidoo kale casharrada dheeriga ah ee kombiyuutarka. Fadlan lifaaqa ka fiiri xayeysiin ku saabsan AI.

Ugu dambeyn waad ku mahadsan tihiiin caawintiinna ololaha Rags to Riches campaign. Waxaan awoodnay in aan la wadaagno dhawr bac oo dhar ah shirkadda, kuwaan waxaa loo diri doonaa Ukraine si loo isticmaalo waxaanna helnay lacag dhan £90 taasoo dugsiga iyo Guddiga Sinnaanta ay go'aamin doonaan waxa lagu kharashgareyn doono.

Mahadsanidiin,
Mrs L-H

Booqashada fasalka 6 ee Xirfadaha Nololsha

Carruurta fasalkeenna 6 waxay dhawaan booqasho waxbarasho ah ku tageen Xirfadaha Nololsha ee Koonfurta Bristol. Xirfadaha Nololsha waxay abuureen xaalad is-dhexgal macquul ah taasoo carruurta ka caawineysa in ay bartaan sida loola macaamilo khatarta weyn ama xaaladaha dhibaata leh kuwaasoo loogu caawinaaya jawi taageero leh. Inta ay booqashada ku jireen, carruurta waxay khibrado kala duwan ka qaateen xaalado nolo-dhab ah, oo ay ku jiraan nabadgelyada jidka iyo tareenka, sida loola tacaalo khataraha qolka cunta-karinta iyo kan fadhiga, barashada nabadgelyada korontada ee saldhig-hoosaadka. Waxay kaloo tijaabo ku sameeyeen sida loo diro taleefanka degdegga ah iyo baaritaan farsamooyinka aas-aasiga ee gargaarka degdegga ah. Waxbarashadaan leh khibrada gacanta-tooska ah oo keli ah ma aha mid akhbaar kororsi ah ee xataa waa mid xiiso leh, oo ay carruurta aad ugu riyaaqeen maalintaas. Waxaan mahad leh shaqaalaha Xarunta oo bixiyey fursaddaas qaalgiga ah si ardaydeenna looga caawiyo in loo diyaariyo dunida dhabta ah.

Taariikhaha Xusuus-Qorka

- 5^{ta} Febraayo – Albaabka furan, kaalay fasalkalaga billaabo 3:00 si aad u aragtid waxbarashada canuggaada.
- 10^{ka} Febraayo – Maalinta Badbaadada Internetka
- 16^{da} Feb- 20th Feb – Fasaxa Xilliga.



Imaanshaha
Celceliska imaanshaha dugsiga guud ahaan usbuucii hore wuxuu ahaa **94%** kaasoo u dhaw **yoolkeenna 96%**. Dhammaantiin waad ku mahadsan tihiiin caawinaaddiina arrintaan. **Risabshanka iyo Fasalka 6 waxay dhaafeen yoolkeenna 96%**, iyadoo fasalka **2** uu gaaray yoolka. Hambalyo Fasalka **3** waxa yar ayuu ka hooseeyey iyagoo keenay **95%**.


Waxaan ognahay in filashada Dowaladda iyo Cabot ay yihiin in carruurta dugsiga ay yimaadaan maalin walba haddii ay si aad ah u xanuunsaneyn.

Haddii uu canuggaada xanuunsan yahay ee uusan imaan karin dugsiga, fadlan kala soo xiriir xafiiska dugsiga 01173772630 si aad ugu sheegto. Waxaa laga yaabaa in aan guriga soo booqanno haddii aan war kaa maqli weyno adiga waxaana laga yaabaa in aan sameyno booqasho guri ee nabad-ku-negaansho haddii uu canuggaada maalmo badan xanuunsado.

Zones of Regulation

ZoR waa mashruuc diiradda saaraaya habeynta shucuurta iyo fahamka dareenka. Fasalka ama kulannada guud marka la joogo, waxaan ka hadalnaa sida loo aqoonsado shucuurta iyo sida xeryaha shucuucta la iskaga gudbo si loogu noqdo xerada cagaaran.

What Zone Are You In?



Heesaha
Heesaha waxay yihiin kuwo caan ah waana ku faannaa carruurta oo dhan kuwaasoo bandhig ka sameeyey Bristol Beacon. Dhammaantiin kuwo wanaagsan ayaad ahaydeen! Mid ka mid ah carruurteena ayaa bandhig keli ah sameeyey kaasoo aad u wanaagsanaa waxaanna la dhacnay kalsooniidiinna.

Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumto warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630